

Martigaad

Ka qeybqaado in aad sheegtid aragtidaada ku wajahan barnaamijka hordhaca «introduksjonsprogrammet»!

Salaan,

Waxa markii ugu horeysay lagu martigaadayaa dhamaan ka qeybgaleyaasha barnaamijka hordhaca «introduksjonsprogram» ee in ay ka qeybqaataan weydiinta isticmaaleyaasha. Waxan rajeynaynaa in aad isticmaashid fursadan si aad aragtidaada u sheegtid!

Weydiintan waxa sameynaaya Agaasinka Isdhexgalka iyo Kaladuwanaanshaha-Integrerings- og mangfoldsdirektoratet (IMDi).

Si IMDi iyo Degmadaadu adiga iyo ka qeybgalayaasha kale deeq ka sii fiican kuu siiyaan, waxa rabnaa in aan ogaano waayo-aragnimadaada ka qeyb-gale ahaan. Waxa muhiim ah in si laabfuran oo daacada u jawaabtid si aan xog sax ah oo ku saabsan waxa u baahan hagaajinta u helno. Tusaale waxa lagu weydiin doonaa in aad ku qanacsantahay waxbarashada aad ka qeybqaadatid, in aad jeceshahay ka qeybgalka barnaamijka, iyo in aad u aragtid in wax ka mid ah barnaamijku aanay fiicnayn.

Waa ikhtiyaari in aad ka qeybqaadataa, qiyaastii 30 daqiiqo ayey qaadanaysaa ka jawaabidda weydiintani.

Weydiintan isticmaalayaashu waa qarsoodi, Jawaabaha aad bixisid adiga laguguma soo sooci karo. Dhawaan xogta oo idil waxa loo maareynayaa si qarsoodi ah, keliyana waxa fasax u leh shaqaalaha mashruuca IMDi iyo cilmi-baadhiyaal dhowr ah oo la soo xulay. Cid kale oo Degmeda ka mid ah ama cid kale fursad u heli mayso in ay aragto waxad ku jawaabtay.

Haddii aad su'aal u heysid weydiintan ama aad la kulantid cilad farsamo, kala xiriir IMDi e-mailka: post@imdi.no Fariinta mailkaaga ciwaan uga dhig: Brukerundersøkelse.

Degmedaada ayaa kuu fasaxaysa gelidda ka qeybgelidda weydiintan.

Waad ku mahadsantahay ka qeybgeliddaada aad ku waanjineysid barnaamijka hordhaca «introduksjonsprogrammet»!

Salaan wacan

Integrerings- og mangfoldsdirektoratet(Agaasinka Isdhexgalka iyo Kaladuwanaanshaha)



post@imdi.no

www.imdi.no

Ka baaraandegga weydiintan waxa asal u ah jawaab-bixiyuhu ogolaanshaha uu bixiyo.

Wixii su´aal ah ee ku saabsan Ilaalada axwaasha shakhsiga ee weydiinta waxa loo diri karaa

Karianne Thun kth@imdi.no

Wixii cabasho ah ee ku saabsan IMDi siday u maareysay Ilaalada axwaasha shakhsiga waxa loo

diri karaa Datatilsynet (Hay´adda eegidda axwaasha shakhsiga). Wixii warbixin ee dheerad ah

waxa aad ka heli kartaa barta internetka ee Datatilsynet,